Warsidaha
# CASRI
Caddadka 2aad | Juunyo | 2018
Lix Biloodle ay soo saarto Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada



# Soomaaliya oo dib u hanatay Astaanta Qaranka ee dotSO

**Miisaaniyadda Wasaaradda Boostada oo Seddax Jibaarantay**

**Soomaaliya iyo ITU oo Heshiis Iskaashi wada Gaaray**

# CASRI

**Warsidaha CASRI, waa Lix Biloodle, ay soo saarto Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada**

**Cinwaan:**

: **Jamhuria Road, P.O. Box 66, Mogadishu – Somalia.**
@ : **info@mptt.gov.so**
: **http://www.mptt.gov.so**
: **facebook.com/mpttsomalia**
: **twitter.com.com/mpttsomalia**

# Tusmada


7 Shirweynaha Qaran ee Wadatashiga Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada

10 Golaha Wasiirada, Baarlamaanka iyo Aqalka Sare oo ansixiyay X. Isgaarsiinta

14 Guul Qaran : Saxiixa Sharciga Isgaarsiinta Qaranka

16 10 Sababood oo sahashay in si deg-deg ah loo ansixiyo Sharciga Isgaarsiinta

25 Dib u habaynta Maamulka iyo Qaab-dhismeedka Wasaaradda Boostada

27 Daraasad ku saabsan Baraha internetka ee Hay'adaha Dowladda

29 Xiriirka ka dhexeeya go'itaanka Internetka iyo Dhaqaalaha Dalka

30 Furitaanka Xarunta Maamulka Internetka ee Hay'adaha Dowladda

31 Miisaaniyadda Wasaaradda oo saddex jibaarantay

32 Heshiis dhinaca Isgaarsiinta oo ay wada gaareen Soomaaliya iyo Jabuuti

34 Heshiis Iskaashi oo dhexmary Soomaaliya iyo ITU

Hordhac

# Hordhac

HORDHAC

CASRI waa war-side cusub ay soo saarto Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada oo loogu talo galay in lagu soo bandhigo waxqabadka Wasaaradda iyo farriimaha ay dooneyso in la gaarsiiyo dadweynaha.

Wargeyskan oo soo bixi doona lixdii biloodba mar, waxaa aasaas u ah inuu dhiirrigeliyo Saddexda rukun ee ay Wasaaraddan ku taagan tahay ama ka kooban tahay waxayna kala yihiin:

- Boosto: gudbinta farriimaha daabacan iyo alaabta
- Isgaarsiinta: gudbinta farriimaha codka iyo internetka ah
- Teknoolojiyada: gudbinta adeegyada kala duwan, iyadoo la adeegsanayo teknoolojiyada casriga ah.

Saddexdoodaba waxaa ka dhexeeya waa inay isku XIRAYAAN DADWEYNAHA. Sidaasi darteed, bay tahay wasaaraddani mid isku xirta wax kasta oo aan looga maarmin adeeg kasta oo la bixinayo ha ahaato mid dhaqaale, bulsho, dawladeed, iwm.

War-sidaha Casri wuxuu noqon doonaa halkii lagu soo bandhigayay adeegyadaas iyo qiimaha ay ku fadhiyaan isgaarsiinta iyo isku-xirka dadweynaha.

BARO WASAARADDA

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolojiyada waa hay'adda dawladeed ee heer federal ee ugu sarreysa ee u xilsaaran sidii loo dajin lahaa, loona fulin lahaa, siyaasadaha iyo sharciyada qaran ee la xiriira arrimaha Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada.

Waajibaadka Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolojiyada waxaa ugu waaweyn:

- In la dajiyo siyaasadaha iyo shuruucda lagu dhaqayo isgaarsiinta, boostada, iyo teknooljiyada dalka
- In la horumariyo kaabayaasha isgaarsiinta iyo teknolojiyada ee dalka
- In la ilaaliyo danaha dadweynaha adeegsada boostada, isgaarsiinta iyo teknolojiyada
- In la abuuro dhaqaale ku saleysan aqoon, lana abuuro bulsho wacyi sarreysa.
- Si ay gudato waajibaadkeeda, waxaa Wasaaradda hagaya Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya iyo sharciyada kale ee la xiriira Wasaaradda.

HIRAALKA

In muwaadiniin kasta uu helo adeegyo isgaarsiineed (noocyada kala duwan) oo la awoodi karo, tayo leh, isla markaana waara.

WAXAAN QABANO

Wasaaraddani waxay u taagan tahay in la horumariyo, sare loo qaado, la isku xiro, lana sharciyeeyo adeegyada boostada, isgaarsiinta iyo teknoolojiyada si loo amba-qaado horumar dhaqan-dhaqaale.

WAAJIBAADKA WASAARADDA

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolojiyada waa hay'adda dawladeed ee ugu sarreysa dalka ee mas'uulka ah inay dajiso siyaasadaha iyo sharciyada ee arrimaha boostada, isgaarsiinta iyo teknolojiyada.

QIYAMKA AASAASIGA AH

Hawlaha Wasaaradda waxaa hagaya qiyamkan aasaasiga ah:

- Hufnaan
- Daah-furnaan
- Isla-xisaabtan
- Sinnaan iyo caddaalad
- Hal-abuur

# Erayga Wasiirka



Sanadkii hore wuxuu Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada u ahaa sanad waxqabad oo lagu tallaabsaday horumar ballaaran. Horumarkaas wuxuu madaxda dalka, shaqaalaha Wasaaradda iyo shacabka Soomaaliyeedba geliyay yididiilo cusub.

Waxqabadkii ugu ballaarnaa ee sanadkii tegay wuxuu ahaa ansixinta Sharciga Isgaarsiinta Qaranka oo muddo ka badan 10 sano qabyo ahaa, iyadoo dalku uu baahi weyn u qabo. Guushii laga gaaray sharcigaasi waxay ka mid ahayd waxqabadkii ugu waaweynaa ee sanadka.

Guusha laga gaaray sharcigaas ma ahayn mid ay Wasaaadda oo kaliya lahayd. Waxaan halkan uga mahad celinaya qof kasta oo kaalin ka geystay sidii guul looga gaari lahaa sharcigaas. Waxaan ka billaabayaa madaxweynaha qaranka, Mudane Maxamed C/laahi (Farmaajo) oo geed-fadhi u ahaa hawlaha aan qabaneynay, isla taageero buuxda siinayay.

Waxaa kaloo mahadnaq ballaaran aan u soo jeedinayaa guddoonka labada gole ee Baarlamaanka Soomaaliya, Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan (Jawaari), Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo Mudane Cabdi Xaashi C/laahi, Guddoomiyaha Aqalka Sare, kuwaasoo na siiyay taageero weyn.

Waxaa sidoo kale aad noola shaqeeyay labada guddi ee isgaarsiinta iyo warfaafinta ee labada aqal, gaar ahaan guddoomiyeyaashooda Xildhibaan Khaalid Macow C/qaadir iyo Senator Abdi Axmed Dhuxulow (Dhag-dheer).

Waxaan kaloo ammaan ballaaran aan u soo jeedinayaa Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda, Mudane Xasan Cali Kheyre oo si gaar ah noogala shaqeeyay guulihii aan gaarnay. Wuxuu xil gaar ah iska saaray in uu taageero u fidiyo hawlaha kala duwan ee ay Wasaaraddu waddo, gaar ahaan arrimaha sharciga iyo nidaaminta isgaarsiinta.

Waxaan sidoo kale ammaanayaa saaxiibadey aan ka wada tirsannahay Golaha Wasiirrada, gaar ahaan wasiiru-dawlaha Wasaaradda, Mudane C/laahi Bile Nuur iyo wasiir ku-xigeenka Wasaaradda, Mudane Ibraahim Yarow Isaaq oo gacan weyn igu siiyay hawlaha la ii igmaday, kuwaasoo la'aantood aan wax badan lagu guuleysan lahayn.

Hawshii aan soo qabanay sanadkii hore waxay aad uga yar tahay hawsha baaxadda leh ee taalla ee na sugeysa. Waxaan ku rajo weynahay haddii Alle oggolaado inaan sii laba-jibbaarno guulihii aan gaarnay, si aan dalka uga tagno taariikh loo aayo. Qof kasta oo hadafkaas gacan ka geysan karana waxaan ka codsanayaa inuu nagu taageero.

**Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada**
**Mudane Eng. Cabdi Cashuur Xasan**

# Wasiirka Boostada iyo Isgarsiinta oo kulan gaar ah la qaatay safiirka Denmark ee Soomaaliya




[Jannaayo 2018]

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada Eng. Cabdi Cashuur  Xasan ayaa magaallada Muqdisho ku qaabilay Safiirka Denmark u fadhiya Soomaaliya Mette Knudsen.

Wasiirka iyo Safiirka ayaa ka wada hadlay hawlo la xiriira horumarinta kaabayaasha Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada dalka, iyagoo isla eegay qaabka ugu habboon ee ay labada dal isaga kaashan karaan horumarinta isgaarsiinta iyo teknolojiyada.

Wasiirka waxaa ku wehliyay qaabiladdaas mas'uuliyiin ka tirsan Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada.



# Eng. Canshuur oo sheegay in la dhisayo Hay'ad nidaamisa Isgarsiinta Dalka.



[Janaayo 2018]

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Mudane Eng Cabdi Cashuur Xasan, ayaa sheegay in mudnaanta 1aad ee Wasaaradda xilligan ay tahay sidii loo dhisi lahaa Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo loogu talogalay inay nidaamiso isgaarsiinta dalka.

Wasiirka oo ka hadlayay aqoon-is-weydaarsi socday muddo 3 maalmood ah oo loo qabtay shirkadaha isgaarsiinta, shirkado la-talin iyo Kooxda Hawl-fulinta oo loogu talogalay inay taageero farsamo ka geystaan sidii loo dhisi lahaa hay'addii ugu horreysay ee nidaamisa isgaarsiinta dalka.

Wasiirka ayaa sheegay in markii Madaxweynaha Jamhuuriyaddu uu saxiixay Xeerka Isgaarsiinta Qaranka bishii Oktoobar 2017, ay Wasaaraddu ka dalbatay Bankiga Adduunka taageero farsamo oo lagu dhisayo Hay'addan, iyadoo Bankigu uu gacan ka geystay in la hawlgeliyo khubaro Wasaaradda kala talin doona sida ugu habboon ee lagu dhisi karo Hay'ad nidaamisa, isla markaana horumarisa isgaarsiinta dalka.

"Waxaad haysataan fursad naadir ah oo aad ku aasaaseysaan hay'ad cusub oo aysan xannibeynin caqabadaha maamul ee haysta hay'adaheena dawladeed ee hore u jiray. Waxaad mas'uul ka tihiin guusha ama guuldarrada hay'addan cusub, waxaana idinku adkeynayaa inaad sameysaan wax kasta oo awooddiina ah - qof qof iyo koox ahaanba - oo aad dalka ugu aasaaseysaan hay'ad sharaf iyo awood leh," ayuu yiri Wasiirku.

Wasiirka ayaa ku adkeeyay in cid kasta oo ku lug leh dhismaha hay'addan laga doonayo in ay ka soo dhalaasho kaalinteeda kaga aaddan dhismaha hay'addan cusub. "Waxaan dooneynaa inaan dhisno hay'ad tusaale u noqota oo ay ku daydaan hay'adaha kale ee dawladeed" ayuu intaasi ku daray.

Ugu dambeyntii Wasiirka ayaa u mahad celiyay Bankiga Adduunka oo taageero farsamo u fidinaya dhismaha Hay'addan Isgaarsiinta Qaranka, isla markaana marti-geliyay aqoon-isweydaarsigan

# GOLAHA WASIIRRADA OO ANSIXIYAY MAAREEYAHA HAY'ADDA ISGAARSIINTA QARANKA

Febraayo, 2018



Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka ayaa cod aqlabiyad leh ku ansixiyay Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo loo magacaabay Mudane Cabdi Sheekh Axmed, oo ah khabiir dhinaca isgaarsiinta iyo teknoolojiyada ah.

Tallaabadan ayaa aasaas u ah dhismaha Guddiga Sare ee Hay'adda Isgaarsiinta oo lagu hawlanaa tan iyo markii uu Madaxweynaha dalka uu saxiixay Xeerka Isgaarsiinta Qaranka 2dii Oktoobar 2017, isla markaana ay ku soo baxday faafinta rasmiga ah 20-kii bishii Nofeembar ee isla sanadkaas.

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada, Mudane Eng Cabdi Cashuur Xasan oo soo dhoweeyay ansixintan ayaa uga mahad celiyay Golaha Wasiirrada ansixinta Maareeyaha Hay'addani oo noqoneysa tii ugu horreysay ee nooceeda ah ee uu dalku yeesho.

"Farxad ayay noo tahay inaan dhismaha hay'addan ku soo gabagabeyno 90-kii cisho ee uu sharciga na siinayay oo ka billaabaneysay saxiixa Madaxweynaha iyo faafinta rasmiga. Waxa ugu muhiimsan ee uu sharcigu dhigayay waxay ahayd dhismaha Hay'addan oo qaban doonta dhammaan hawlaha la xiriira nidaaminta isgaarsiinta dalka," ayuu yiri wasiir Cashuur.

"Ballan baan ku qaadnay in ansixinta sharciga aysan noo ahayn hadaf haddii aysan la socon fulintiisa. Maantana waa tallaabo kale oo taariikhi ah oo loo qaaday hirgelinta sharcigan oo muhiim u ah dalka," ayuu yiri wasiirku.

Taariikhda Maareeyaha Cusub Mudane Cabdi Sheekh waa khabiir aqoon iyo waayo-aragnimo dheer u leh arrimaha la xiriira isgaarsiinta, teknoolojiyada iyo maamulka. Wuxuu muddo ka badan 23 sano la shaqeynayay mid ka mid ah shirkadaha isgaarsiinta ugu waaweyn dalka Mareykanka oo la yiraahdo Verizon Communications, halkaasoo oo uu ka soo qabtay xilalka kala duwan oo heer maamul sare ah.

Laga soo billaabo Nofeember 2012-kii – kolkaasoo uu dalka ku soo laabtay - wuxuu la-taliye sare ka ahaa Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha, isagoo la soo shaqeeyay Ra'iisul Wasaareyaal kala duwan.

Intuu uu xafiiska Ra'iisul wasaaraha ka shaqeynayay laga soo billaabo 2013-kii wuxuu dareemay baahida loo qabo in la aasaaso waax qaabilsan dhisidda awoodda hay'adaha dawladda (capacity development), taas oo uu Ra'iisul wasaare Saacid ku magacaabay wareegto.

Si arrintaas loo fuliyo wuxuu kala shaqeeyay Bankiga Adduunka iyo UNDP sidii loo sameyn lahaa mashruuc ballaaran oo lagu horumarinayo awoodda hay'adaha dawladda (Capacity Injection Program), kaas oo haatan hirgalay, ayna ku kacayso $53 milyan oo doolar.

Laga soo billaabo bishii Abriil 2017, wuxuu ka shaqeynayay Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada, isagoo gacan weyn ka geystay ansixintii Sharciga Isgaarsiinta Qaranka, dhismaha awoodda Wasaaradda iyo xiriirka ay Wasaaraddu la leedahay dalalka iyo hay'adaha horumarinta ka shaqeeya oo ay ka mid tahay Hay'adda Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU), wuxuuna ka shaqeeyay in xiriirkii Wasaaradda ee heer caalami uu sare u kaco.

Dhinaca aqoonta, Mudane Cabdi Sheekh wuxuu shahaadada koowaad ku qaatay cilmiga kumbutarka ee jaamacadda Houston, isagoo shahaadada heerka labaad ee Master of Science (specialization in Information Systems) iyo Maamulka Hawlaha (MBA) uu ka kala qaatay ee jaamacadaha Denver iyo North Carolina oo dhammaantood ku yaalla dalka Mareykanka.

# Shir wadatashi ah oo loo qabtay Shirkadaha Isgaarsiinta Dalka




Febraayo, 2018

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada ayaa maanta shir wada-tashi ah u qabatay shirkadaha isgaarsiinta Soomaaliyeed, kaas oo looga hadlayay sida ugu habboon ee loo hirgelin karo Sharciga Isgaarsiinta Qaranka oo la ansixiyay sanadkii hore.

Waxaa shirka lagu soo bandhigay qorshaha dhismaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo ay ku hawlan yihiin khubaro Soomaali ah, oo farsama ahaan kala talin doona Hay'adda hannaanka dhismaha koowaad.

Maamulaha Machadka Heritage, Mudane C/rashiid Khaliif, oo hay'addiisu oo ay shaqo-wadaag yihiin shirkadda caalamiga ah ee Kalba, ay Wasaaradda kala talineyso dhismaha Hay'adda ayaa sheegay in isgaarsiinta Soomaaliya ay maanta haysato fursad qaali ah, sida madax dhinaca Wasaaradda iyo dhinaca Hay'adda oo aqoon iyo karti leh, aqoonyahanno Soomaaliyeed oo ka shaqeynaya dhismaha iyo bahda isgaarsiinta oo u heellan inay la shaqeeyaan.

Maareeyaha cusub ayaa u mahad celiyay Madaxweynaha, Ra'iisul Wasaaraha, Golaha Wasiirrada, iyo gaar ahaan Wasiirka Wasaaradda, Md. Eng Cabdi Cashuur iyo ku-xigeennadiisa kalsoonida ballaaran iyo xilka culus ee ay ku aamineen, wuxuuna ballanqaaday in uu si ammaano leh uga soo bixi doono masuuliyaddaas loo xil saaray.

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada, Mudane Eng. Cabdi Cashuur Xasan, ayaa u sheegay ka qeybgalayaasha Shirka in Wasaaradda ay dhaqan u tahay inay mar kastaba la tashato bahda isgaarsiinta sidii loo nidaamin iyo horumarin lahaa isgaarsiinta Soomaaliya si wanaagsanna loogu daryeeli lahaa danta macaamiisha iyo dalkaba.

Sidoo kale wasiirku wuxuu warbixin ka bixiyay waxyaabaha ay Wasaaraddu ka qabatay ansixinta sharciga, isagoo xusay in hawlaha hadda yaalla ee la xiriira dhismaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka inaysan ka culeys yaraan doonin hawshii lagu guuleystay ee ansixinta sharciga.

Ugu dambeyntii wasiirka ayaa soo dhoweeyay Mudane Cabdi Sheekh Axmed, oo dhowaan uu Golaha Wasiirradu ansixiyay inuu noqdo maareeyihii ugu horreeyay ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, isagoo uga mahad celiyay madaxweynaha, Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada kalsoonida ay ku aamineen maareeyaha cusub, wuxuuna ballan qaaday in Wasaaraddu la shaqeyn doonto maamulka cusub ee loo soo dhisi doona Hay'adda.

# Xarunta Macluumaadka Shabakadaha Soomaaliyeed




Xarunta Macluumaadka Shabakadaha Soomaaliyeed (Somali Network Information Center) ee loo yaqaano SONIC waa diiwangaliyaha loogu talogalay Domainka (.SO).waxeyna ku hayan xogta Magacyada diiwaangashan ee astaanta Internet-ka dalka (ccTLD)

SONIC Waxa ay mas'uul ka tahay maamulka astaanta Internet-ka dalka (ccTLD), (dotSO), si loogu adeegsado danta Qaranka Soomaaliyeed iyo bahda isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka. Maqnaasho dheer kadib waxa dib loo howgaliyay kowdii November 2010kii , waxaana maamulayey Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta, iyadoo laga soo diiwangaliyay meelo badan oo caalamka ka tirsan.

Wixii ka dambeeyay 9kii Maarso 2018, SONIC waxey hoos timaadaa Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo u xilsaaran maamulka Astaanta Qaranka ee Internet-ka dalka.

### Hawlgalka SONIC (MISION)

In la Howlgaliyo, la Maareeyo, lana horumariya astaanta Internet-ka dalka ee (.SO), iyadoo la joogteynayo xasilooonida shaqo iyo hubinta isticmaalka kaabayaasha iyo keydka xogta ee saxda ah oo la isku haleyn karo iyo suurtogelinta adeegyo la awoodi karo.

### Aragtida (VISION)

In aan ka mid noqono diiwaangaliyeysha (registries)-ka ugu sumcada wanaagsan looguna kalsooni badan yahay caalamka.

### Shaqada (FUNCTIONS)

SONIC waxey u xilsaaaran tahay qodobbada soo socda:

- La jaanqaadidda habdhaqanka ugu wanaagsan caalamka ee maamulka iyo maareynta dhammaan magacyada laga diiwaangaliyo astaanta internet-ka dalka ee (DotSO) sida ugu wanagsan ee waafaqsan heerarka caalamiga ah

- In ay SONIC noqoto cidda keliya ee lagala xariirayo maamulka domainka (.SO) iyo farsamadiisa.

- In ay SONIC Maamusho Domainka (.SO) ccTLD iyo Domainska kale ee dheeraadka ah.

- Horumarinta wacyiga dadweynaha ee faa'iidooyinka dhaqaale iyo ganacsiga ee Diiwaangelinta magacyada internetka.

- In la soo saaro tilmaamaha shuruudaha iyo nidaamyada ku saabsan diiwaangelinta website-yada

- Iney (.SO) ku matasho dhamman shirarka caalamiga ah.

- Ku dhaqanka dhammaan siyaasadaha Internetka ee caalamiga ah ee ICANN iyo ka qeybqaadashada horumarintooda.

SONIC
Somali Network Information Center
المركز الصومالي لمعلومات الشبكية

# Diiwaangesho Magacaaga iyo Ganacsigaaga

## Mareegtaada Waa Astaantaada Soomaalinimo

Diiwaangesho astaanta .SO

Haddii aad danaynayso in aad diiwaangeshato astaanta .SO, fadlan la xiriir mid ka mid ah shirkadaha diiwaangeliya astaanta Soomaaliyeed ee .SO

http://sonic.so/registrars/
http://asalsolutions.com/
http://ileysinc.com/
http://www.sostec.so/
http://www.tabaarakict.com/




**[.SO] Summadda Qaranka Soomaaliyeed**

# ASTAANTA QARANKA EE INTE
# LAGU SOO WAREEJIYAY HAY'A



Maarso, 2018

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa si rasmi ah ula soo wareegtay Astaanta Qaranka ee Internetka Soomaaliya (dotSO) oo ay maamuli jirtay hay'ad ka madaxbannaan Dowladda, balse wixii hadda ka dambeeya lagu soo wareejiyay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo masuul ka ah maamulka Astaanta qaranka sida uu qorayo qodobka 54aad ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka

Qeybta hore ee wareejinta ayaa ahayd heshiis 7dii Maarso 2018 dhex maray Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka iyo shirkadda Cloud Registry oo adeegyo farsamo siisa astaanta qaranka, halka qeybta dambe ee xil-wareejinta ay sameeyeen maamulkii hore ee SONIC oo haatan si buuxda ay ula wareegtay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

Agaasimihii hore ee SONIC, Mudane C/casiis Xuseen Cumar, oo xilkaas iska casilay, mas'uuliyaddana ku wareejiyey Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, ayaa sheegay inuu ku faraxsan yahay inuu muddo adeeggan u soo hayay dalka, ugu dambeyntiina uu mas'uuliyaddaas ku soo celiyo Dawladda.

Maareeyaha cusub ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Cabdi Sheekh Axmed, ayaa sheegay in sharciga isgaarsiintu uu qorayo in furaha taleefoonka (252) iyo astaanta internetka (dotSO) ay yihiin hanti qaran oo ay qasab tahay in ay ku soo noqdaan gacanta dawladda, waxayna tallaabo billow ah u tahay in hantidii qaranka dib loogu soo celiyo gacanta dawladda, isaga oo sidoo kale ugu mahadceliyey Wasiirka Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Tiknolojiyadda waqtiga badan ee uu geliyey sidii ay u suurtogeli lahayd wareejintan.

Waxaa munaasabadda xil-wareejinta iyo wada-hadalladii saxiixa heshiiska qeyb iyo goobjoogba ka ahaa Wasiirka Boostada iyo Isgaarsiinta, wasiirka xannaanada xoolaha, Mudane Sheekh Nuur Maxamed, Garyaqaanka Guud ee Qaranka, iyo wakiil ka socday Xafiiska Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka, oo heshiiska u kala qaabilsanaa

# RNETKA SOOMAALIYA OO ADDA ISGAARSIINTA QARANKA



hubinta sharciga iyo xisaabaadka, waxayna gebogebo u ahayd hannaan soo socday muddo 10 bilood ah oo uu billaabay Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada 15-kii Abriil, 2017, laba toddobaad ka dib markii uu xilka la wareegay.

"Maanta waa maalin kale oo guul u ah Wasaaradda, xukuumadda, iyo guud ahaan ummadda Soomaaliyeed. Inkastoo aan anigu hoggaaminta lahaa, haddana guusha laga gaaray arintan waxaa ka qeyb qaatay dad badan oo aan u mahadcelinayo gaar ahaan Madaxweynaha iyo Ra'iisul-wasaaraha oo kalsooni iyo taageeraba nagu siiyay arrintaan illaa maalintii aan u istaagnay, waxa ayna ka mid ahayd arrimaha mudnaanta u leh Wasaaradda, oo aan ka shaqo billawnay 2 toddobaad ka dib markii aan xilka la wareegnay" ayuu yiri Mudane Eng. Cabdi Cashuur oo sidoo kale u mahadceliyay wasiirka Xannaanada Xoolaha, Garyaqaanka Guud ee Qaranka oo hawshan gacan weyn ka geystay iyo sidoo kale shaqaalihii iyo Maamulkii SONIC oo uu ugu horreeyay Mudane C/casiis oo si xilkasnimo leh u soo wareejiyay hantidan qaran.

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada, Mudane Eng Cabdi Cashuur Xasan, ayaa hormuud ka ahaa ansixinta sharciga isgaarsiinta oo muddo 12 sano ah qabyo ahaa. Sidoo kale wuxuu waqti badan geliyey in astaanta qaranka (dotSO) lagu soo wareejiyo gacanta dawladda, arrintaas oo iyaduna muddo sanooyin ah soo jiitameysay oo aan wax guul ah laga gaarin wixii ka horreeyay 8da Maarso 2018.

Waxaa dhowaan Muqdisho lagu qaban doonaa munaasabad lagu soo bandhigi doono sida adeeggan ay uga faa'iideysan doonaan dawladda iyo shacabka Soomaaliyeed, iyo qorshe cusub ee lagu horumarinayo oo muddo laga soo shaqeynayay

# HAY'ADDA ISGAARSIINTA QARANKA
## oo si rasmi ah u hawlgashay



Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada ayaa ka warbixiyay guulaha laga gaaray dhismaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo dhowaan loo sameeyay Hay'ad Maamul (Borad of Directors), taasoo ahayd tallaabo kale oo loo qaaday in nidaam iyo kala-dambeyn loo sameeyo isgaarsiinta dalka.

Wasiirka ayaa sheegay in dhismaha guddigan uu yimid muddo 6 bilood ah ka dib oo ay Wasaaraddu wada-tashiyo caddeymo leh la yeelanaysay dhinacyada uu sharcigu dhigayo oo kala ah dawladda, dhinacyada isgaarsiinta (sectorka) iyo xubno ka kala imanaya bulshada rayidka iyo bahda sharci-yaqaannada, si loo dhiso guddi dhammeystiran.

Wuxuu xusay inuu ku faraxsan yahay aqoonta iyo waayo-aragnimada xubnaha guddigan ka dib markii uu la kulmay dhammaadkii bishii hore, isagoo intaasi ku daray in guddigan uusan ahayn mid siyaasadeed, balse uu yahay mid farsamo oo aqoon iyo waayo-aragnimo lagu xushay.

Wasiirka oo uu dhinaciisa fadhiyay wasiir ku-xigeenka Wasaaradda, ayaa sheegay in Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ay gacan ka geysan doonto sidii loo fulin lahaa sharciga isgaarsiinta, isagoo xusay in loo baahan yahay in fursad la siiyo si ay u gutaan waajibaadkooda.

Isaga oo ka hadlayay ahmiyadda Hay'addan, ayaa Wasiirku waxa uu sheegay in uu culeys badan kala kulmay ansixintii sharcigan oo muddo 12 sano ah soo jiitamayay, balse aysan Xukuumaddu oggolaan doonin in sanado kale ay qaadato dhaqan-gelinta sharcigan maadaama ujeeddada ansixinta sharcigan aysan ahayn inuu warqado ku qornaado.

Wasiirka oo ka hadlayay farqiga u dhexeeya nuqulka ku soo baxay faafinta rasmiga iyo asalkii ay ansixiyeen labada aqal ee Baarlamaanka,




gaar ahaan xubinta ka imanaysa sharciyaqaannada, ayaa sheegay in khaladka uu yimid kadib markii nuqulka uu Golaha Shacabka soo gudbiyay uu soo xigtay asalkii sharciga ay Xukuumaddu u gudbisay Baarlamaanka, balse isbeddelkii uu sameeyay Baarlamaanka aan lagu xusin.

"Waxaa asal ah nuqulka ay ansixiyeen Golayaasha Baarlamaanka, sixitaanka arrintaana waxay u taallaa xafiisyada ay khuseyso, kuwaasoo haatan ku hawlan," ayuu yiri wasiirku.

Ugu dambeyntii Wasiirku wuxuu sheegay in albaabka Wasaaradda uu u furan yahay ciddii tabasho qabta oo soo mareysa nidaamka dawladeed. "Waxaan ogsoonnahay in sharciga la ansixiyay iyo guddiganba aysan ahayn kuwo aan ceeb lahayn.

Laakiin si loo gaaro wax dhammeystiran waa in meel eber ah laga billaabo oo sanad walba la horumariyo. Haddiise laga fekerayo in laga billaabo 100%, waxaa cad inaan joogeyno halkii aan joognay intii aan sharciga la ansixinin," ayuu yiri wasiirka oo intaas ku daray "waxaan rajeynayaa in waxqabadka Hay'addan iyo Guddiga la magacaabayba la mahadin doono mustaqbalka, waayo hadda dadka uma muuqan karaan faa'iidooyinka sharciga iyo Hay'addaba.

Marka waxaan leeyahay yaan laga hordhicin oo waqti ha la siiyo, hana lala shaqeeyo Hay'adda."

# 10 ARRIMOOD DARDAARINKII WASIIRKA

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada ayaa 10 arrimood kula dardaarmay Guddiga Sare (Board of Directors) ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.



## Dardaaranka Koowaad

**Aqoon iyo Karti:** Markii la magacaabayay Guddigan iyadoo lagala tashaday madaxda ugu sarreysa dalka, waxaa la qiimeeyay aqoonta iyo waayo-aragnimada mas'uuliyiintan si Qaranka dad fiican loogu soo xulo. Maadaama aynan aqoonin inta badan dadka la magacaabay, balse la qiimeeyay taariikhdooda (CV), waxaa nasiib wanaag noqotay in aqoonta iyo waayo-aragnimada mas'uulyiintan iyo kartidooda iyo amaanadooda ay is waafaqeen.

## Dardaaranka Labaad

**Dhiirrigelin:** Guddigan waxay ku shaqeynayaan qaab iskaa-wax-u-qabso ah, waxay soo dayaceen shaqadooda.

Inta badan xubnahana waxaa laga codsaday oo laga soo baryay inay xubin ka noqdaan Guddiga Sare ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

Haddaba xubnaha waxaan ku dhiirrigelinayaa inay ogaadaan inay u adeegayaan dalkooda iyo dadkooda.

## Dardaaranka Seddaxaad

**Niyad-wanaag:** Markii aan hawshan galeynay waxaan ku sameynay niyad-wanaag. Waxaad ogaataan inaysan jirin hawl aan dhaliil lahayn, weliba xilligan oo ay dalka ku baaheen isqabqabsiga, shakiga iyo in wax kasta warbaahinta la isku mariyo halkii la wada fariisan lahaa.

Haddaba waa inaan ku wada shaqaynaa niyad-wanaag, is-tixgelin iyo howlkarnimo.

*Dardaaranka* *Afaraad*

**Sharciyad:** Waxaan idin xusuusinayaa in sharciyadda Guddiga iyo Hay'addaba ay ku xirnaan doonto sida aad u shaqeysaan iyo go'aamada aad qaadataan, kuwaas ayaa la idinku qiimeyn doonaa

*Dardaaranka* *Shanaad*

**Wax cusub:** Waxaan dareensanahay in sharcigan iyo dhismaha Hay'addanba culeys iyo dhibaato laga soo maray. Waxyaabaha culeyska keenaya waxaa ugu badan iyadoo hawshan ay tahay mid ku cusub dalkeena. Sharcigu wuu cusub yahay, hay'addu waa cusub tahay. Sidoo kale waxaa cusub qaabka uu u dhisan yahay Guddoonka Sare. Waxyaabahaas oo dhan waxay nooga baahan yihiin inaan dulqaad u yeelano oo aan la sugno inta ay dadkeenu baran doonaan.

*Dardaaranka* *Lixaad*

**Taariikh sameyn:** Waxaad ogaataan in dhammaanteen aan taariikh sameyneyno. Waxaad galeysaan taariikh ah inaad noqoteen guddigii ugu horreeyay ee Hay'addan.

Haddii aad wax wanaagsan sameysaan waa la idin mahadcelin doonaa. Haddii aad wax khaladdaana ogaada inaadan xilkan ku waari doonin oo dad idinka dambeeya ay sixi doonaan wixii aad khaladeen.

*Dardaaranka* *Todobaad*

**Hawlo baaxad leh:** Sharcigan wuxuu soo jiitamayay 12 sano. Hay'addana waxay ahayd inay mar hore dhisanto. Shaqooyinkii ay ahayd inay noo qabsoomaan sanado ka hor ayaa loo baahan yahay in degdeg loo qabto si aan uga daba tagno adduunka. Waxaa la idinka doonayaa inaad u shaqeysaan si ka badan hay'adaha kale ee adduunka si aan uga soo kabsano sanadihii badnaa ee naga lumay.

*Dardaaranka* *Siddeedaad*

**Caddaalad:** Qofka xilka haya sida uu ku yimaaday iyo deegaanka uu ka soo jeedo micne ma sameynayaan marka aad qabato xil qaran. Waa inaad caddaalad u sameysaa dadka iyo shirkadaha oo dhan. Waa inaad u dhexeysaan dhammaan shirkadaha oo dhan, kuwa hadda jooga iyo kuwa iman doonaba.

*Dardaaranka* *Sagaalaal*

**Qiimeyn:** Waxqabadkiina ayaa la idinku qiimeyn doonaa. Marka aad qabataan wax wanaagsan waxa aad noqoneysaan dad iyo hay'ad lagu faano. Haddiise aad ka gaabisaan waxqabadkiina adinka oo keliya ma guuldarreysane waxaa dalka ka lumaya sanado kale oo wax kale lagu qaban lahaa.

*Dardaaranka* *Tobnaad*

**Wax dhammeystiran ma leh:** Waxaad ogaataan in aysan adduunyada jirin wax dhammeystiran. La idinkama sugayo wax 100% dhammeystiran, laakiin waa inaad ku dadaashaan inaad sameysaan wax kasta oo aad awoodaan oo aad dalkiina ugu adeegi kartaan.

# Awoodda iyo Waajibaadka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

Qodobka 6aad ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka ayaa ka hadlaya awoodda iyo waajibaadka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, kuwaasoo kala ah:

1. Hay'addu waxay yeelaneysaa awoodda maamul ee isgaarsiinta qaranka, sida rukhsad bixinta iyo xeer-nidaaminta adeegyada isgaarsiinta dhammaan soohdimaha Soomaaliya si waafaqsan sharcigan.

2. Ka sokow arrimaha ku xusan faqradda kowaad, Hay'addu waxay awood u yeelanaysaa fulinta arrimaha soo socda:

a. Waxay geli kartaa heshiisyo, qaadan kartaa deyn iyadoo la raacayo nidaamka maaliyadeed ee dalka.

b. In ay yeelato, haysato, gadato, kireysato hanti guurta ah ama ma-guurta ah si waafaqsan sharciga maaliyadeed ee Qaranka.

3. Talo-bixinta, diyaarinta xeer-hoosaadyada la xiriira Qeybaha Isgaarsiinta, kana qeyb-qaataan fulintooda, iyadoo hay'addu la-tashanaysa dhinacyada ay quseyso (wasaaradda iyo adeeg-bixiyeyaasha).

4. Soo-saaridda xeer-nidaamiyeyaal iyo go'aanno lagama-maarmaan u ah fulinta xilkeeda iyo sharcigan, kuwaas oo ay ka mid yihiin, xeerarka aasaasiga ah ee farsamo ee hay'adda.

5. Bixinta rukhsadaha iyo soo-jeedinta canshuuraha la xiriira maareynta hirarka, kala-soocidda xisaabaha, isku-xirka, la-socodka shabakadaha iyo adeegyada isgaarsiineed.

6. Talo-ka-bixinta qiimaha tariifadaha, lambarrada iyo kobcinta tartanka Isgaarsiinta.

7. Xallinta khilaafaadka shirkadaha iyagoo u saaraya guddiyo farsamo oo dhexdhexaadiya.

8. Ilaalinta xuquuqda macaamiisha, iyadoo si gaar ah loo eegayo:-

a. Ilaalinta sirta macaamiisha iyo xogaha adeegga;

b. Tariifada Adeegga;

c. Suurta-galnimada iyo helidda adeegga; iyo

d. Tayada iyo heerka adeegga.

9. Diyaarinta shuruudaha, hal-beegga, iyo habka loo bixinayo shatiyada shabakadaha, adeegga Isgaarsiinta iyo isticmaalidda mowjadaha iyada oo aan waxba loo dhimayn shuruudaha sharcigani jideeyey.

10. Hay'addu in ay qaaddo talaabooyinka lagama-maarmaanka u ah si loo xakameeyo ciddii jebisa ama ku xad-gudubta xeerkan.



# "dotSO waxay ka dhexeysaa Soomaali oo idil" Eng Cashuur

Guul weyn oo taariikhi ah ayay inoo tahay in maamulka astaanta internetka ee Soomaaliya ee (.so) ay la wareegto Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, oo sidoo kale maamuli doonta isticmaalka furaha taleefoonka (252), oo labaduba ah hanti qaran.

Soomaali kasta oo ku nool Jamhuuriyadda wuxuu xaq u leeyahay inuu adeegsado furaha taleefoonka (252) iyo kan internet-ka (.so).

Waxaa sidoo kale xaq u leh qof, shirkad, ama hay'ad kasta oo dalka ka hawl gasha. Waa calaamad muujineysa juquraafi ahaan iyo aqoonsi ahaanba halka aad ku nooshahay, ka diiwaan gashan tahay ama ka shaqeyso.

Astaanta interntka waxaa si gaar ah ugu baahan shirkadaha, jaamacadaha iyo ururrada waddaniga ah, si ay u muujiyaan inay ka dhisan yihiin Soomaaliya iyo xaaladda diiwaangelin ee ay dalkaasi ka haystaan haddii ay tahay .edu.so, org.so, iwm.

DotSO waxaa maanta laga isticmaalaa adduunka oo dhan, in laga hor istaago qeybo ka mid ah dadkii Soomaaliyeed ee xaqa u lahaana waa go'aan aan u adeegeynin danaha dadka, shirkadaha, hay'adaha iyo jaamacadaha Soomaaliyeed, waayo waxay halkaas ku weynayaan in la aamino iyo in ay wax la qabsan karaan shirkadaha, hay'adaha iyo jaamacadaha kale ee dhiggooda ah.

DotSO waa hanti qaran oo uu wax ku leeyahay Soomaali kasta, inuu fa'iideystana waa mid ka mid ah xuquuqaha muwaadinka. Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada waxaan diyaar u nahay inaan fududeyso sidii dhammaan shacabka Soomaaliyeed meel kastoo ay joogaan ay uga faa'ideysan lahaayeen adeeggan, waxaana dhowaan soo bandhigi doonna qorshe ballaaran oo la xiriira ka faa'iideysiga Astaanta dotSO.

> *"dotSO waxa Hanti Qaran"*
> *Eng. Cashuur*

# Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo kulan wadatashi ah u qabatay shirkadaha diiwaangeliya dotSO

**(Abriil 2018)**

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo ay hoos timaaddo Astaanta Internetka Dalka (dotSO) ayaa kulan wadatashi ah u qabatay shirkadaha Soomaaliyeed ee diiwaan-geliya dotSO.

Ujeeddada kulanka oo ka dhacay Xarunta KMG ah ee Hay'adda ayaa ahayd in la dhageysto caqabadaha haysta shirkadahan iyo talooyinka ay soo jeedinayaan si loogu biiriyo qorshaha dib-u-habeynta ee lagu sameynayo astaanta Qaranka si ay uga tarjunto ujeeddooyinkii loo aasaasay.
Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Cabdi Sheekh Axmed, oo kulanka furay ayaa sheegay in SONIC wixii hadda ka dambeeya aysan ahayn shirkad qof leeyahay, balse ay tahay hay'ad dawladeed oo u adeegeysa shacabka.

Wuxuu Maareeyuhu intaasi ku daray in qorshuhu yahay in qof kasta oo Soomaali oo joogo meel kasta oo ka mid ah Jamhuuriyadda uu heli karo dotSO, una isticmaali karo qof ahaan, ganacsi, adeeg waxbarasho, iwm.






Wuxuu sheegay in hadafku uu yahay in la dhiso hay'ad lagu kalsoonaan karo oo la heer ah kuwa caalamiga ah, si taasi loo gaarana la sameyn doono qorshe lagu beddelayo muuqaalka (rebranding) hay'adda SONIC, lana soo bandhigi doono sida wax looga qabanayo caqabadihii hore ay dadku ugu qabeen SONIC.

Maareeyuhu wuxuu sidoo kale sheegay in maamulkii iyo shaqaalihii hore ee gaarka ahaa ee SONIC dhammaantood laga joojiyay shaqada, wixii hadda ka dambeeyana aysan matalin SONIC.

Sidoo kale wuxuu sheegay in lacagaha shirkadaha diiwaangelinta sameeya in lagu qaban doono nidaam banki oo keliya oo aan la aqbali doonin lacag caddaan ah.

Wakiilladii ka socday shirkadaha ayaa ka mahad celiyay kulanka, iyagoo sheegay inay tahay markii ugu horreysay ee kulan noocan ah loo qabto oo laga talogeliyo sida loo maamulayo astaanta qaranka. Waxay ballanqaadeen inay soo dhoweynayaan isbeddellada cusub ee lagu sameynayo maamulka astaanta qaranka, ayna diyaar u yihiin dhankooda wada shaqayn hufan.




# Wasiirka Boostada oo ka qaybgalay Shir Sanadeedka Teknolojiyada ee UNISO


**(Abriil 2018)**

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyda Eng. Cabdi Cashuur Cabdi ayaa ka qaybgalay shir sanadeedka teknolojiyada ee Jaamacadda Soomaaliya "UNISO".

Wasiirka ayaa bogaadiyay howshaa qiimaha badan ee ay ku dhaqaaqday Jaamacadda Soomaaliya oo ku tilmaamay mid ka qaybqaadanaysa horumarinta teknolojida dalka.

Wasiirka Boostada Eng. Cashuur oo shirkaas ka hadlay ayaa sheegay inuu aad ugu farxay tayada barnaamijyada iyo cilmi-baarista halkaas lagu soo bandhigay.

"Waxaan aaminsanahay in shir sanadeedka teknolojiyada ee Jaamacadda Soomaaliya uu qayb ka qaadanayo sidii loo horumarin lahaa hal-abuurka teknoolojiyada dalka" ayuu yiri Wasiirka oo u ballanqaday Jaamacadda Soomaaliya in Wasaaraddiisu ay gacan wayn ka siin doonto jaamacadda sidii ay uga miro dhallin lahayd hadafkeeda ah kor u qaadidda tayada aqoonta teknolojiyaada ardayda Soomaaliyeed.




# MAALINTA CAALA TEKNOOLOJIYADA

**(Abriil 2018)**

Aqoon-is-weydaarsi lagu xusayay Maalinta Caalamiga ah ee ee Gabdhaha iyo Teknoolojiyada (ICT) ayaa lagu qabtay magaalada Muqdisho, iyadoo munaasabaddaasna looga dhawaaqay barnaamij lagu kobcinayo gabdhaha bartay ICT-da ee ka baxay jaamacadaha dalka.




Kulankan oo ay soo qabanqaabisay Barnaamijka Fursad ee hoos taga Hay'adda Iftin Foundation oo kaashaneysa Somali REN iyo Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada ayaa looga gol lahaa in dawladda, bahda waxbarashada iyo ganacsatadaba lagu dareensiiyo caqabadaha ay la kulmaan gabdhaha barta ICT-da.

C/qaadir Macallin Max'ed oo maareeye ka ah Fursad ayaa soo jeediyay daraasad ay ka sameeyeen gabdhaha culuumta ICT ka dhammeeyay 23 jaamacadood oo ku kala yaalla Puntland, GalMudug, HirShabelle, Benaadir, Koonfur Galbeed iyo Jubbaland, taasi oo muujineysa in 1,231 ardey oo ICT dhammeysay sanadkii 2017 in 115 ka mid ah (oo dhiganta 9%) ay gabdho yihiin.

Wuxuu intaasi ku daray in gabdhahaas tirada yar ee soo baxay ay dhibaatooyin dheeri ah kala kulmaan sidii ay shaqooyin u heli lahaayeen.

Safiya Xasan Abshir oo ku hadleysay magaca gabdhaha munaasabadda joogay ayaa sheegtay in caqabadaha haysta gabdhaha bartay ICT ay ka badan yihiin kuwa bartay culuumta kale.

Waxay intaasi raacisay in ICT labs oo yar, shaqo-barasho (internships) oo aan jirin iyo kala-go'naan ka dhexeysa suuqa iyo waxa jaamacadda lagu barto ay keeneen in wixii ay jaamacadda ku soo barteen aysan xiriir la lahayn waxa looga baahan yahay suuqa shaqada.

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada oo aqoonis-weydaarsiga soo xiray ayaa sheegay inuu ka walaacsan yahay xogta la soo bandhigay ee ka hadleysa waxbarashada gabdhaha ee ICT-da iyo sida ay shaqooyinka ku helaan.

Wuxuu sheegay inuu caqabadahaas qaar ka mid ah kala kulmay Wasaaradda oo gabdhaha ICT bartay ee ka shaqeeya ay ka yar yihiin 1%.

# MIGA EE GABDHAHA & OO MUQDISHO LAGA XUSAY






**1,231** ARDAY
ayaa baratay culuunta ICT

**115** ARDAY
ayaa gabdho ka ah

**9%** KELIYA AYAY GABDHUHU KA AHAAYEEN ARDAYDII BARATY ICT 2017.

Wasiirku wuxuu sheegay inuu aaminsan yahay in gabdhuhu yihiin hal-abuurayaal cajiib ah oo soo hindisi kara waxyaabo xal u noqon kara qaar ka mid ah dhibaatooyinka na haysta haddii la siiyo agabka ay u baahan yihiin iyo jawi ku habboon.

Wasiirka oo hadalkiisa sii wata wuxuu yiri “Wasaaraddu diyaar bay u tahay inay iska kaashadaan jaamacadaha iyo shirkadaha ganacsiga, si gaar ah kuwa isgaarsiinta iyo internetka, sidii wax looga qaban lahaa caqabadahan”.

Wuxuu Wasiirku ka hadlay in guulihii laga gaaray bilihii la soo dhaafay ansixinta Sharciga Isgaarsiinta iyo soo wareejinta astaanta internetka iyo adeegsiga xargaha internetka inay abuuri doonaan fursado hor leh oo ka dhigi doonta in shaqooyinka ICT-du noqdaan kuwa ugu mushaarka badan, aadna loo xiiseeyo, isagoo intaasi ku daray inay ka shaqeyn doonaan sidii aysan gabdhuhu fursadahaas uga qadi lahayn oo qeybta ay xaqa u leeyihiin ay uga heli lahaayeen.

“Waa inaan gabdhaheena jecleysiinaa teknoolojiyada si ay uga faa’iideystaan, waxna ugu soo kordhiyaan. sida aan wada ognahayba waxay horey uga faa’iideysteen caafimaadka, waxbarashada, iwm. Haddaba waa inaan ku dhiirrigelineynaa sidii gabdhuhu ay qeyb uga noqon lahaayeen horumarkaas aan higsaneyno, oo aysan uga harin bulshada inteeda kale” ayuu hadalkiisa ku soo gabagabeeyay, Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada.

# DARAASAD LAGA SAMEEYAY GABDHAHA SOO BARTAY ICT (INFORMATION & COMMUNICATION TECHNOLOGY)



*Wasiirka Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada Eng. Cabdi Cashuur ayaa sheegay inuu aaminsan yahay in gabdhuhu yihiin hal-abuurayaal cajiib ah oo soo hindisi kara waxyaabo xal u noqon kara qaar ka mid ah dhibaatooyinka, na haysta haddii la siiyo agabka ay u baahan yihiin iyo jawi ku habboon.*

*Hadalakan ayuu Wasiirku ka jeediyay xuska Maalinta Caalamiga ah ee ee Gabdhaha iyo Teknoolojiyada, oo lagu qabtay magaallada Muqdisho.*

*Wasiirku wuxuu si aad ah u saluugay tirada yartaa ee gabdhaha ah ee soo bartay ICT, isagoo sheegay in arrintaas dib u eegis lagu sameeyo.*

Daraasad ay samaysay Hay'adda Iftin Foundation ayaa lagu sheegay in guud ahaan ardayda Soomaaliyeed ee ka soo qalinjebisay jaamacadaha dalka sanadkii hore ee 2017, ay gaarayeen 11,263 arday, wiilasha ayaa gaaray 7,460, halka gabdhuhuna ay ahaayeen 3,803.

Dhinaca kale daraasadda ayaa si gaar ah u eegtay gabdhaha ka soo baxay kulliyadaha Computer Science/IT & BIT, kuwaas oo noqday 115 gadhood oo keliya, halka wiilasha ka soo baxay isla kulliyadahaas ay gaarayeen 1,116 arday.

Wasiirka Boosatada iyo Ishgaarsiinta Eng Cashuur ayaa sheegay in wasaaraddiisu ay diyaar u tahay xallinta caqabadaha gabdhaha ka hortaagan inay soo bartaan ICT (Information and Communication Technology).

"Wasaaraddeena waxay diyaar u tahay in jaamacadaha dalka ay kala shaqayso sidii loo dhiirigelin lahaa, loona kordhin lahaa gabdhaha baranaya ICT, isla markaana loo tayayn lahaa waxbarashadooda" sidaa waxaa yiri Wasiirka Boostada oo muujinayay sida ay uga go'an tahay kor u qaadidda gabdhaha baranaya teknilojiyada iyo cilmiga computerka.

Dhinaca kale mar uu wasiirku ka hadlayay shaqo u helista gabdhaha soo barta cilmiga ICT wuxuu sheegay in wasaaraddiisu ay diyaar u tahay in ganacsatada iyo shirkadaha isgaarsiinta kala shaqayso sidii fursado shaqo loogu abuuri lahaa ardayda soo barata ICT gaar ahaan gabdhaha.




Daraasaddan ay soo saartay Hay'adda Iftin Foundation waxaa ka qaybqaatay 36 jaamacadood oo ku kala yaala dalka oo dhan min Boosaaso ilaa Jowhar, Muqdisho ilaa Kismaayo, Baydhabo iyo magaalooyin kale. balse 23 oo ka mida jaamcadahaas ayaa lahaa kulliyadaha laga barto cilmiga ICT, daraasadduna waxay si gaar ah u eegaysay 23kaa jaamacadooda.

Shaxda hoos ku qoran ayaa muujinaysa tirada ardayda soo baratay ICT ee soo qalinjebiyay sanadkii hore ee 2017

| No | Jaamacadda | Wiilal | Gabdho | Wadar | % |
|---|---|---|---|---|---|
| 1 | Mogadishu University | 28 | 3 | 31 | 10% |
| 2 | Benadir University | 13 | 2 | 15 | 13% |
| 3 | Jamhuriya University | 68 | 8 | 76 | 11% |
| 4 | Darul-Hikma University | 5 | 0 | 5 | 0% |
| 5 | Salam University | 22 | 12 | 32 | 38% |
| 6 | Horn Of Africa University | 30 | 6 | 36 | 17% |
| 7 | UNISO | 206 | 9 | 215 | 4% |
| 8 | Horsed International University | 144 | 8 | 152 | 5% |
| 9 | Plasma University | 37 | 7 | 44 | 16% |
| 10 | Modern University | 9 | 1 | 10 | 10% |
| 11 | Jobkey University | 132 | 11 | 143 | 8% |
| 12 | Jazeera University | 13 | 1 | 14 | 7% |
| 13 | Imam University | 12 | 0 | 12 | 0% |
| 14 | SIU | 84 | 4 | 88 | 5% |
| 15 | Beledwein University | 12 | 2 | 14 | 14% |
| 16 | Islamic University | 6 | 2 | 8 | 25% |
| 17 | Bay University | 6 | 0 | 6 | 0% |
| 18 | Hiran University | 2 | 2 | 4 | 50% |
| 19 | Galkayo University | 76 | 18 | 94 | 19% |
| 20 | Simad University | 108 | 12 | 120 | 10% |
| 21 | Bosaso University | 28 | 0 | 28 | 0% |
| 22 | East Africa University | 58 | 4 | 62 | 6% |
| 23 | PSU | 17 | 3 | 20 | 15% |
| **Wadar** | | **1,116** | **115** | **1,231** | **9%** |

*Dib-u-hawl-gelinta*

# MACHADKA ISGAARSIINTA QARANKA

*Baahinta Aqoonta Teknoolojiyada ee Dalka*

Email: info@nti.edu.so
Website: www.nti.edu.so

# SOOMAALIYA OO DHISEYSA XARUNTII UGU HORREYSAY EE IS-WEYDAARSIGA INTERNETKA

**(Abriil 2018)**



Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada ayaa billowday dhismaha Xarunta Is-weydaarsiga Internet-ka (Internet Exchange Point) ee magaalada Muqdisho (MogIX), taas oo fududeyn doonta in shirkadaha bixiya adeegyada internetka ay isku xirmaan, isla markaana isku weydaarsadaan xogtooda.

Nishal Goburdhan oo ah khabiir ku takhasusay dhismaha IXPs oo ka socda Hay'adda Packet Clearing House oo dalal badan ka caawisa dhismaha xarumahan oo kale, ayaa sheegay in xaruntan ay sare u qaadi doonto adeegyada kala duwan ee u baahan internet.

Wakiillo ka kala socda shirkadaha isgaarsiinta, inter-netka, dalladaha jaamacadaha, xirfadleyda teknoolojiyada, iyo dawladda, ayaa muujiyay in ay baahi weyn u qabaan inay ku soo biiraan MogIX.

Muddada uu socdo aqoon-is-weydaarsigan waxay wakiilladu ka doodi doonaan qaabka ugu wanaagsan ee xaruntan loo maamuli karo, iyagoo ugu dambeynta sameyn doona guddi ku-meel-gaar ah oo maamula xaruntan.

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolojiyada, Mudane Eng. Cabdi Cashuur Xasan, oo furay aqoon-is-weydaarsigan ayaa sheegay in dhismaha MogIX uu ka mid ah yahay qorshayaasha ay Wasaaraddu ku dhiseyso kaabayaasha isgaarsiinta dalka, isla markaana uu wax weyn ku soo kordhin doono isgaarsiinta iyo teknoolojiyada dalka.

"Wasaaraddu way awoodday in qalabkan lagu rakibo dhismaha Wasaaradda oo maamulkeeda aan 100% hayno, shirkadahana aan u sheegno inay ku soo xirmaan. Laakiin waxaan dooneynaa inay noqoto adeeg la wada leeyahay oo yaalla meel dhexdhexaad ah oo la wada horumariyo.

Wadatashi iyo kalsooni ayaan ku xaqiijinay waxyaabihii noo qabsoomay 12kii bilood ee la soo dhaafay, taas ayaana sii wadeynaa," ayuu yiri wasiirka oo intaasi ku daray in wasaaraddu soo dhoweyn doonto talooyinka ka soo baxa aqoon-is-weydaarsigan.

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada ayaa bilooyinkii la soo dhaafay ku guuleysatay ansixinta sharciga isgaarsiinta, dhismaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka iyo la-soo-wareegidda astaanta qaranka (dotSO).

Dhismaha xaruntana wuxuu hordhac u yahay dhismaha kaabayaasha isgaarsiinta dalka oo u furan shirkadaha Isgaarsiinta oo dhan.

# Xuska Maalinta Isgaarsiinta Adduunka oo looga hadlay horumarinta teknolojiyada Soomaaliya.



**[Maajo, 2018]**

Soomaaliya ayaa ku biirtay dalalka caalamka ee laga xusay maalinta caalamiga ah ee isgaarsiinta 17ka Maajo 2018, si dadweynaha loogu wacyigeliyo loona tuso sida ay isgaarsiintu qiimo ugu leedahay nolosheena.

Mowduuca sanadkan wuxuu ku saabsanaa sida artificial intelligence (AI) ay u dardargelin karto horumarka, iyadoo ay soo baxayaan qalab iyo adeegyo ku shaqeeya AI oo loo adeegsan karo in lagu horumariyo nolosha dadka ee dhinacyada waxbarashada, caafimaadka, beeraha, gaadiidka, iyo qaybaha kala duwan ee nolosha bani'aadamka.

Mas'uuliyiinta farsamada ee ka socda shirkadaha isgaarsiinta, internetka, dalladaha jaamacadaha iyo dawladda, oo ka qeybgalay munaasabadda ayaa ka hadlay baahida loo qabo in dhinacyada oo dhan ay iska kaashadaan sidii loo horumarin lahaa teknoolojiyada dalka.

Agaasimaha Guud ee KMG ee Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada, Mudane C/raxmaan Macallin Caddow (Foodcadde) oo soo xiray aqoon-is-weydaarsiga ayaa sheegay in Wasaaraddu ay ka shaqeyneyso sidii dhallinyarada Soomaaliyeed loogu caawin lahaa inay hal-abuuraan adeegyo casri ah oo wax ka beddela nolosha muwaadiniinta Soomaaliyeed, isagoo intaasi ku daray in maanta wax kasta oo la sameeyo inaan looga maarmin teknoolojiyad.

Agaasimuhu wuxuu intaasi ku daray in fursado badan ay soo bixi doonaan haddii laga faa'iideysto aqoonta artificial intelligence, wasaaradduna ay gacan weyn ka geysaneyso sidii isgaarsiinta iyo teknoolojiyada dalka loo sii horumarin lahaa.
Sanad kasta 17ka Maajo, Hay'adda Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU) waxay xustaa markii la aasaasay hay'addaas, isla markaana la saxiixay Shirweynihii Telegaraafka ee Caalamiga ah sanadkii 1865tii

# Noocyada dotSO

## .GOV.SO

Waxaa loogu talogalay xafiisyada dowladeed ee heer federaal. Xafiis dowladeed ee aan lahayn .GOV.SO way adag tahay si loo aamino

## .COM.SO

Waxaa loogu talogalay ganacsiyada kala duwan. Haddii aad leedahay ganacsi, yaan lagaa hor qaadaan magacaaga.

## .ORG.SO

Waxaa loogu talogalay hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn. Haddii aad leedahay hay'ad yaan lagaa hor qaadan magacaaga

## NET.SO

Waxaa loogu talogalay shirkadaha ka shaqeeya arrimaha internet-ka iyo teknolojiyada

## .EDU.SO

Waxaa loogu talogalay jaamacadaha iyo xarumaha tacliinta sare. Haddabo diiwaangasho magacaaga

Noocyada dotSO

# Wasiirka Boostada oo Socdaal Shaqo ku tagay Puntland



**Febraayo, 2018**

Wafdi uu hoggaaminayay Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada, Md. Eng Cabdi Cashuur Xasan, ayaa safar shaqo ku soo maray magaalooyin ka tirsan Puntland.

Wasiirka oo ay safarka ku wehliyeen Wasiiru-dawlaha, Mudane C/laahi Bile Nuur iyo hawl-wadeenno ka tirsan Wasaaradda, ayaa socdaalkiisa ka billaabay caasimadda Puntland ee Garoowe, waxayna ujeeddadiisu ahayd sidii loo sii xoojin lahaa wada-shaqeynta, loona soo kormeeri lahaa mashaariicda ay Wasaaraddu ku lug leedahay ee ka socda Puntland iyo xarigga internetka ee shirkadda Golis.

Wasiirka iyo wafdigiisa ayaa ugu horreyntii kulan kula yeeshay magaalada Garoowe Madaxweynaha Puntland, Dr. C/weli Maxamed Cali (Gaas), wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Boostada iyo Isgaarsiinta Puntland, Cabdi Xersi Cali (Qarjab), iyo mas'uuliyiin kale, waxayna ka wada hadleen sidii loo xoojin lahaa wada-shaqeynta ka dhexeysa wasaaradda heer federal iyo dawlad-goboleed, iyagoo isku afgartay dhammaan qodobadii ay ka wada hadleen.

Wasiirku wuxuu sidoo kale booqday xarunta uu ka soo dego xarigga badda hoosteeda mara ee internetka (fiber optic cable) ee ay dhowaan magaalada Boosaaso ka hirgelisay shirkadda Golis. Wasiirka oo kulan gaar ah la yeeshay mas'uuliyiinta Golis ayaa uga mahad celiyay sida ay uga soo jawaabeen baaqii uu hore u jeediyay ee uu ku dhiirigelinayay shirkadaha inay dalka keenaan xargo kale.

Ugu dambeyntii wasiirka ayaa ka mahad celiyay soo-dhoweyntii loo sameeyay isaga iyo wafdigiisa. "Waxaan uga mahad celinayaa madaxweynaha Puntland, wasiirka isgaarsiinta iyo ku-xigeennadiisa iyo madaxda Golis sida sharafta leh ee ay noo soo dhoweeyeen, waxaan rajeyneynaa inaan sii kordhin doonno wada-shaqeynteena," ayuu hadalkiisa ku soo gabagabeeyay wasiirku



# Wasaaradda Boostada & Isgaarsiinta oo qabanqaabineysa shirweynaha Isgaarsiinta Soomaaliya iyo Jabuuti

**Febraayo, 2018**

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolojiyada ayaa sheegay in wasaaraddu qabanqaabineyso shirweyne ay ka soo qeyb galayaan shirkadaha isgaarsiinta ee dalalka Soomaaliya iyo Jabuuti, kaas oo looga xaajoon doono sida la isaga kaashan karo mashruuca xarigga internetka ee Djibouti African Regional Express (DARE) oo ay fikraddiisa leedahay shirkadda Isgaarsiinta ee Jabuuti.

Wasiirka ayaa hadalkan sheegay ka dib markii uu soo gabagabeeyay socdaal 2 maalmood qaatay oo u ku tegay dalka Jabuuti, isagoo xusay in qabsoomidda shirweynahaan ay ka wada shaqeynayaan Wasaaradda Isgaarsiinta ee dalka Jabuuti, ujeeddaduna tahay sidii looga arrinsan lahaa mashruuca DARE oo ah xarig internet oo isku xiraya Jabuuti iyo Mombasa, isagoo sii maraya Berbera, Boosaaso iyo Muqdisho.

Wasiirka ayaa intaasi ku daray in ansixintii sharciga isgaarsiinta iyo tirada xargaha internetka oo ku yar dalka ay fursado iskaashi oo heer gobol ah u furayaan shirkadaha isgaarsiinta Soomaalida.



Mudane Eng Cabdi Cashuur Xasan wuxuu sidoo kale xusay in Boostada Soomaaliya ay billowday in warqadaha loo soo marsiiyo dalka Jabuuti, iyadoo dhowaanna la qorsheynayo in warqadaha ka baxaya Soomaaliya ay sii maraan dalka Jabuuti.

Safarkan wasiirka ayaa imanaya qiyaastii 6 bilood ka dib markii uu dhiggiisa Jabuuti, Mudane Abdi Youssouf Sougueh la saxiixday heshiis ay labada wasaaradood isaga kaashanayaan horumarinta arrimaha isgaarsiinta iyo boostada ee labada dal.

"Waxaan jecelahay inaan u mahadceliyo Wasiirka Isgaarsiinta Jabuuti oo si wanaagsan noo soo dhoweeyay. Waxaana rajeyneynaa in marka ay Muqdisho noogu yimaadaan dhammaadka bisha dambe in aan go'aan ka wada gaari doonno arrimaha aan isku soo afgaranay," ayuu hadalkiisa ku soo gabagabeeyay Wasiirka Boostada iyo Isgaarsiinta Mudane Eng. Cabdi Cashuur.




# Ra'iisal Wasaare Kheyre oo booqday xarunta Isgaarsiinta ee Jabuuti

**Juun, 2018**

Wafidi uu hoggaaminayo Ra'iisal Wasaare Xasan Cali Kheyre ayaa safar shaqo ku tegay dalka Jabuuti.

Ra'iisal Wasaaraha ayaa intii uu joogay dalka Jabuuti wuxuu soo booqday Xarunta Isgaarsiinta dowladda Jabuuti, halkaasoo si diiran loogu soo dhaweeyay.

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada waxay muddooyinkanba xiriir dhow la lahayd dhiggeeda Jabuuti sidii ay isaga kaashan lahaayeen dhinacyada xargaha internetka iyo boostada, ugana faa'iideysan lahayd waaya-aragnimada Jabuuti ee dhinacyadaas.

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada ee Soomaaliya Mudane Eng. Cabdi Cashuur Xasan oo ka mid ahaa wasiirrada safarka ku wehliya Ra'iisal Wasaaraha ayaa dhowr oo hore safarro kala duwan ku tegay dalka Jabuuti,



R/Wasaare Kheyre oo warbixin ka dhagaysanaya masuuliyinta Djabouti Telecom

isagoo halkaasi kula soo saxiixday dhiggiisa Jabuuti Mudane Abdi Youssouf Sougueh hesiishyo iskaashi iyo kuwo horumarineed oo ku aaddan dhinacyada Isgaarsiinta, Boostada iyo weliba Teknolojiyada, iyadoo qaar badan oo ka mid qodobbada heshiisyadasi la hirgeliyay.

# MASHRUUCA QOLALKA SHIRARKA HAY'ADAHA DAWLADDA OO LA DAAH-FURAY



Guddoomiyaha Aqalka Sare iyo Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada ayaa si rasmi ah u furay qolka shirarka ee Aqalka Sare, kaasi oo qeyb ka ah mashruuc ballaaran oo lagu fududeynayo xiriirka hay'adaha dawladeed.

Mashruucan oo uu maalgeliyay Bankiga Adduunka waxaa lagu dhisay 37 qolal shirar oo si casri ah loo qalabeeyay, kuwaasoo min 5 laga dhisay Somaliland, Puntland, GalMudug, HirShabelle, SouthWest and Jubbaland, halka inta soo hartay laga dhisay caasimadda.

Guddoomiyaha Aqalka Sare, Mudane Cabdi Xaashi C/laahi, ayaa uga mahad celiyay Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta inay Aqalka Sare u xusheen daahfurka mashruucan. Guddoomiyuhu wuxuu intaasi ku daray in qolalkan ay Aqalka Sare ka caawin doonaan sidii uu xiriir joogto ah ula yeelan lahaa goleyaasha dawlad-goboleedyada.

Isagoo ka hadlayay munaasabadda lagu daah-furayay mashruucan ayaa Wasiir Cabdi Cashuur Xasan wuxuu uga mahad celiyay Bankiga Adduunka inuu maalgeliyay mashruucan oo lagu dhisayo awoodda hay'adaha dawladeed.

**Waa Socotaa.. Eeg bogga 34**



Wasiirku wuxuu kaloo sheegay in mashruucan oo soo socday sanadihii u dambeeyay la dardar-geliyay bilihii la soo dhaafay si hay'adaha dawladeed ay uga faa'iideystaan farsamada casriga ah.



"Qolalka shirarka waxay leeyihiin faa'iidooyin badan. Waxay sare u qaadi doonaan xiriirka iyo wada-shaqeynta hay'adaha dawladeed; waxay sugayaan amniga madaxda, waxay noo baajinayaan kharashaadka safarrada, waxayna badbaadinayaan deegaanka maadaama safarkii yaraanayo," ayuu yiri wasiirka.

"Waxaan rajeynaynaa in si wanaagsan looga faa'iideysan doono, ayna caawin doonaan dhismaha hay'adaha dawladeed." ayuu hadalkiisii ku soo gebgabeeyay Wasiirka Boostada Eng. Cabdi Cashuur Xasan.







# Machadka Isgaarsiinta Qaranka oo dib loo hawlgeliyay

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta & Teknoolojiyada ayaa dib u hawl-gelisay Machadka Tababarka Isgaarsiinta Qaranka oo hoos tagi jiray Wasaaradda, kaas oo sare u qaadi doonta xirfadaha teknoolojiyada ee dalka.

Machadka oo la aasaasay sanadkii 1976-dii waxaa dhinaca qalabka iyo tababarrada ka caawin jiray Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah (ITU) iyo Hay'adda Horumarinta ee Qaramada Midoobay (UNDP), hase yeeshee waxay hawlihiisi joogsadeen sanadkii 1991-kii. Hase yeeshee, tan iyo sanadkii 2011-kii waxaa la isku dayay in dib loo kiciyo Machadka, waxaase caqabad ka haysatay sidii loo heli lahaa qalabkii farsamada isgaarsiinta iyo teknoolojiyada ee lagu tababaran lahaa, taas oo haatan la xalliyay.

Machadka ayaa haatan lagu diyaariyay sheybaarro computer iyo cisco ah (computer and Cisco labs), waxayna ardeydu ku tababaran karaan internetka Dawladda, dotSO oo laga baranayo sida loo maamulo website-yada, Xarunta Isku-xirka Internetka (Internet Exchange Point), kuwaasoo ay Wasaaradda hirgelisay lixdii bilood ee u dambeysay, iyadoo hawlahaasi ay Wasaaradda kala shaqeyn doonto Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka.

Injineer Cali Afey oo ah Agaasimaha Isgaarsiinta ee Wasaaradda iyo Injineer Daa'uud Cali Jeyte oo ka tirsan Shirkadda NationLink oo ku hadlayay magaca shirkadaha isgaarsiinta, oo labaduba ka tirsanaa ardeydii ka soo aflaxday machadkan, ayaa ka hadlay kaalintii uu machadkan lahaa iyo in aqoontii ay ka kororsadeen ay haatan ku shaqeeyaan maamulayaasha isgaarsiinta dalka.

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada GalMudug, Mudane Axmed Dubbad Cali, oo matalayay wasaaradaha isgaarsiinta ee dawlad-goboleedyada, ayaa ku ammaanay Wasaaradda guusha laga gaaray dib-u-hawl-gelinta Machadka, isagoo u rajeeyay Machadka guulo waaweyn.

Wasiir ku-xigeenka Maaliyadda Prof. C/laahi Sheekh Cali (Qalloocow) iyo Wasiirka Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare, Mudane C/raxmaan Daahir Cusmaan, ayaa labaduba ka hadlay sida aqoonta teknoolojiyada ay u horseedi karto shaqo-abuurista, kordhinta dhaqaalaha, iyo sidii loo dhimi lahaa saboolnimada.

Wasiirka Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyada, Mudane Eng. Cabdi Cashuur Xasan, ayaa sheegay in Machadka uu wax weyn ka qaban doono sidii loo soo saari lahaa xirfadlayaal dhinaca teknoolojiyada ah.






“Markii aan xilka la wareegnay waxaan goosanay inaan Machadka ku dhisno isku-tashi, waxaana qalabkan iyo dayactirka ku sameynay inagoo kaashanay bahda waxbarashada, inaga oo aan Xukuumadda wax lacag weydiisanin,” ayuu yiri wasiirka.

Wasiirka ayaa u mahad celiyay Isku-xirka Waxbarashada iyo Cilmi-baariista Soomaaliya (Somali REN) oo ku deeqay qalabka computer-ka, website-ka iyo dajinta manhajka Machadka, isaga oo ugu baaqay ganacsatada Isgaarsiinta inay markan kaalintooda ka geystaan sidii dhismihii hore ee Machadka loo dhisi lahaa sida ugu dhaqsaha badan.

Wasiirka ayaa ugu dambeyntii ku ammaanay Wasiiru-dawlaha iyo Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda, oo labaduba munaasabadda goobjoog ka ahaa, gacanta ay ka geysteen guulaha degdegga ah ee ay Wasaaraddu ku tallaabsatay.

Ra’iisul-Wasaaraha Xukuumadda, Mudane Xasan Cali Kheyre, oo ka hadlayay xiritaanka munaasabadda, ayaa ku ammaanay Wasaaradda dadaalka ay ku bixisay ansixinta sharciga iyo dhismaha Hay’adda Isgaarsiinta Qaranka iyo inay haatan dib u soo nooleysay Machadkii Isgaarsiinta Qaranka, isagoo sheegay in dhaqaalaha Soomaaliya uu u baahan yahay in isbeddel lagu sameeyo iyadoo la adeegsanayo teknoolojiyadda.

Ra’iisul wasaaraha oo isbarbardhig ku sameynayay waqtiga ku baxa iyo dhaqaalaha ay soo kala saari karaan qofka ku shaqeysta teknoolojiyada iyo qofka ku shaqeysta beero ama xoolo aan cilmi lagu dhaqin ayaa xusay n dadkeena loo jiheeyo dhinaca teknoolojiyada.

“Dhaqaalaheena ma horumari karo haddii aan la helin shaqaale xirfad leh”, ayuu hadalkiisa ku soo gabagabeeyay Ra’iisul Wasaaraha.

BOOSTADA SOOMAALIYA

War Magaalo Warqaduu Ku Yaal

# QIIMAHA SANADKII EE SANDUUQYADA

QIIMAHA **20** DOOLAR

QIIMAHA SANDUUQA SHAKHSIGA EE SANADKII

QIIMAHA **30** DOOLAR

QIIMAHA SANDUUQA EE GANACSIGA, JAAMACADAHA, HAY'ADAHA, IWM

# Boostada Soomaaliya oo billaabeysa dirista warqadaha iyo xirmooyinka 27 sano ka dib

Juun 2018.
Boostada Soomaaliya ayaa sanadkan 2018da gudihiisa billaabeysa adeeggii boostada ee lagu diri jiray warqadaha iyo xirmooyinka oo loo diri karo dhammaan daafaha adduunka.

Boostada Soomaaliya ayaa joojisay adeeggii boostada burburkii ku dhacay Dawladda Soomaaliya sanadkii 1991-kii, hase yeeshee sanadkii 2013-dii ayaa lagu guuleystay in dib loo soo celiyo in warqaduhu iman karaan dalka, hase yeeshee waxaa suurtoobi weysay in warqadaha iyo xirmooyinka ka baxa Soomaaliya loo diri karo dalka dibeddiisa.

Heshiis ay Wasaaraddu la soo gashay Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta Jabuuti bishii Luulyo 2018 ayaa fududeynaya sidii boostada Soomaaliya ee ka baxaysa dalkeena ay u sii mari lahayd dalka Jabuuti, si looga gudbo caqabadaha ka jira dirista boostada Soomaaliya.

Adeegyada Boostadu waxay muhiim u yihiin dawladnimada iyo ilbaxnimada, maadaama ay fududeyneyso sidii la isku dhaafsan lahaa dokomintiyada asalka ah ee ay ku shaqeeyaan hay'adaha dawladeed, hay'adaha iyo safaaradaha adduunka.

Adeegga dirista wuxuu sidoo kale caawini doonaa ganacssatada Soomaaliyeed ee doonaysa inay dhoofiyaan waxyaabaha ay soo saaraan.

Adeegga Boostada sidoo kale wuxuu isku xiri doonaa Soomaalida ku nool dalka gudahiisa iyo kuwa ku nool qurbaha.

Wasaaradda Boostada, Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada oo ku guuleysatay ansixinta sharciga isgaarsiinta, dhismaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, kicinta Machadka Isgaarsiinta Qaranka ayaa haatan xoogga saareysa sidii loo dardargelin lahaa boostada dalka oo ka mid ah qorshayaasha lagu dhisayo kaabayaasha dhaqaalaha dalka.

## BOOSTADA SOOMAALIYA

WAXQABADKA BOOSTADA EE CASRIGAN

### DOKOMINTIYO

Si kastoo uu internet-ku meel kasta u gaaray, waxaan boostada looga maarmin in la isugu gudbiyo dokomintiyada daabacan. Xitaa dalalka horumaray kama maarmaan kaalinta boostada.

### BANKI

Boostadu waa meel la isugu gudbiyo lacagaha. Waa goob adeegyada dawladda lacagtooda lagu bixin karo, taas oo muwaadiniinta u fududeyneysa sidii ay si sahlan ugu heli lahaayeen adeegyada dawladda.



### BADEECOOYIN

Boostadu waxay noqotay meel kala gudbisa badeecooyinka la kala iibsado, gaar ahaan kuwa internetka laga iibsado. Si loo dhiirri-geliyo e-commerce waa inuu dalku leeyahay boosto casri ah.

### ADEEGYO KALA DUWAN

Boostada casriga ah waxay bixisaa adeegyo kale oo ay ka mid yihiin internet, sarrifka lacagaha qalaad. Waa goob ay dadweynuhu ka heli karaan adeegyada xukuumad danabeedka (e-Gov).

CASRI

Warsidaha CASRI, waa Lix Biloodle,
ay soo saarto Wasaaradda Boostada,
Isgaarsiinta & Teknolojiyada


**Cinwaan:**

: Jamhuria Road, P.O. Box 66, Mogadishu – Somalia.
@ : info@mptt.gov.so
: http://www.mptt.gov.so
: facebook.com/mpttsomalia
: twitter.com.com/mpttsomalia